



Datum
2020-03-23

Codeynta degmadda dib ayaa loo dhigayaa coronavirus, covid-19 dartiisa.

Codeynta degmadda ee ku saabsan dugsiga Medåker iyo habeyta iskuullada mustaqbalka dib ayaa loo dhugay, taas oo sabab u ah cudurka 'corona virus', covid-19.

Waxaa lagu go'aamiyay arintaan kulanka hoggaamiyayaasha degmadda oo la qabtay bisha Maarso 19.

- Xaalladda jirta darteed waxa kaliya ee saxda ah mas'uuliyadna ah in dib loo dhigo aftida.

Waa in aan illaalinaa degganayaasha oo aanan cidna khatar caafimaad loo geysanin, ayuu yiri Anders Röhfors, afhayeenka maamulka degmadda.

Waxay ahayd bishii Jannaayo 30-keeda markii ay hoggaamiyayaasha degmadda ay

go'aamiyeen in talo bixin afti degmo oo ku saabsan dugsiga Medåker iyo habeynta mustaqbalka dugsiyada la sameeyo 29-ka Maarso. Taas oo ku saleysan xaaladda immika taagan ee fayruska corona ayaa hoggaamiyayaasha degmada hadda go'aansadeen inay dib u dhigaan.

"Arrin dimuqraadi ah"

Maamulka Caafimaadka Dadweynaha wuxuu ku guubaabinayaa dhammaan dadka

ka weyn da'da 70 inay xaddidaan xiriirkooda bulshadeed. Dadka deggan degmadda Arboga, ayaa ku dhawaad boqolkiiba 20 ka weyn da'da 70 sano.

- Tani waa arin dimuqraadi ah. Qof walbaa waa inuu helaa fursad isku mid ah oo ay ku tagaan kuna codeyn karaan. Sidaa darteed waqtigaan lama qaban karo afti. ayuu yidhi Anders Röhfors.

Degmaddu waxay la tashatay takhtarka ka hortagga infekshanka Gobolka, kaasoo u arkaa in hadda aysan habooneyn in la qabto afti iyada oo la siinayo fiiro gaar ah fayruska corona.

Guddiga doorashaddu waxay la soo noqon doonnaan taariikh cusub

Kulankii hoggaamiyayaasha degmadda waxaa la go'aamiyey in guddiga doorashada howshoodu tahay in ay la socdaan xaaladda quseysa fayruska corona.

Guddiga doorashadda wuxuu la soconayaa horumarka xaalladda dhaceysa kadibna waxay kula soo laaban doonnaan hoggaamiyayaasha degmadda ayaga oo soo jeedinaya taariikhda cusub ee aftida degmada wakhtiga loo arko in ay ku habboon.

Ku saabsan codbixintii hore

Codbixintii hore oo billaabatay 16-kii Maarso waa la joojinayaa laga billaabo Jimcaha bisha Maarso 20-keeda iyo codadka hore oo la soo gudbiyeyna waa la baabi'in doonaa taas oo ah aragtida maamulka doorashadda, tani waxaa lagu sameyn doonaa ayada oo la raacayo go'aan gaar ah ee guddiga doorashadda.